

# Halkan ayaanu rabshadaha kugu weydiineynaa

## Rabshadaha jir ahaaneed

Waxay tusaale ahaan noqon karaan, riixitaan, dhirbaaxo, laadis, qaniinyo, timaha oo la isjiido, la is qabto, cunaha oo la is ceejiyo iyo feer la isku dhufto. Waxa kale oo rabshadaha ka mid ah waxyaalaha la isku hubeeyo, mindiyaha ama hubka.

## Rabshadaha jir ahaaneed

Ayaa tusaale ahaan noqon kara in meel lagaaga dhaco, lagu bahdilo, lagu qasbo, lagu cabudhiyo, lagu hanjabo, lagu go'doomiyo oo lagu dhibaateeyo.

## Rabshadaha galmo ahaaneed

Waxay tusaale ahaan noqon karaan hadallo meel ka dhac iyo quursi ah, ku soo dhawaasho aan la ogoleyn, falal galmo oo qasab ah, kufsi, ceebayn galmada iyo dhibaatayn.

## Rabshadaha dhaqaale ahaaneed

Waxay tusaale ahaan noqon karaan xaddidan la saaro helitaanka lacag la wada leeyahay ama mid gaar loo leeyahay, hanjabaado dhaqaale, handadaad iyo in la isku qasbo sameynta dambiyo dhaqaale.

## Dayacaad

Waxay tusaale ahaan noqon karaan in la isku diido daryeelka caafimaadka iyo daaweynta bukaanka, daryeelka ilkaha, dawooyinka ama agabka caawimada, iyo sidoo kale ka caawinta nadaafadda shaqsi ahaaneed iyo daryeelka aasaasiga ah.

## Rabshadaha Dijitaalka

Waxay tusaale ahaan noqon karaan farriimo hanjabaad ah, dusha kala socoshada wax uu qofku qabanaayo iyo xiriirada baraha bulshada, faafinta sawirrada gaarka ah ama kantaroolida meesha uu qof joogaayo.

**Rabshadaha qarsoon**

Waxa uu taasi micnaheedu ka dhigan yahay inay hanjabaadaha rabshadahu ay qaar had iyo jeer taagan yihiin. Waxay keenaysaa in qofka dhibbanuhu uu ku nool yahay cabsi, uu hab-dhaqankiisa waafajiyo oo uu isla markaana si joogto ah feejigaan ugu jiro inay suurtagal tahay inay rabshado dhaci karaan.

**Rabshadaha iyo dulmiga sharafta la xiriira**

Waxa uu micnaheedu yahay in la iskula kaco kantaroolid, hanjabaado, qasabid ama rabshado lagu ilaalinaayo ama lagu dib loogu soo celinaayo sharafta qoyska ama dadka qaraabada. Loo sameeyo si koox ahaaneed, tusaale ahaan qoyska dhexdiisa, halkaas oo dhowr qof ay ka qaybqaataan ama kantaroolida taageeraan.

